Mankato Clinic

# TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA WADNAHA IYO XIDIDDADA WADNAHA

## BAARISTA KORMEERAHA HOLTER (HOLTER MONITOR) EE 24TA SAAC AMA 48DA SAAC

24 or 48 Hour Holter Monitor Test - Somali

Bukaanka: ____________________________________ Taariikhda Ballanka: ________________

Waqtiga Imaashada: _____________________ am/pm

Goobta: Waaxda Daweynta Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Maxay tahay sababta aan u qaato qalabka Holter Monitor?

Baaristaan waxay qortaa jaantuska Electrocardiogram (ECG ama EKG) ee bukaanka muddo 24 saac ilaa 48 saac inta bukaanka ku sugan yahay hawl maalmeedka caadiga. Waxaa loo isticmaalaa in lagu ogaado cilladaha garaaca, waxyeelada daweynta, iwm.

### Baarista Ka Hor

- Qiyaas ahaan, hawshaan waxay qaadataa 30 daqiiqo.
- Maqaarkaada ha marinin subag, jilciyeyaasa maqaarka ama saliidda cunugga maalinta ballanka.
- **Dumarka:** Fadlan ha soo qaadanin naas celinta dhaadheer, cambuurada ka kooban hal cambuur, cambuurada dhaadheer ama suun.
- Fadlan ogeysii shaqaalaha kliinikada haddii aad qabtid xasaasiyad.

### Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad iska dhigtid dharka laga bilaabo dhexda ilaa kor.
- Diyaarinta maqaarka waxay ku bilaaban doontaa in maro qalalan lagu ruggo. Ragga waxaa loogu xiiri doonaa sida habboon.
- Waxaa xabbadka lagaa saari doonaa shan qaadeyaasha korantada ee halka mar la isticmaalo.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad qortid hawlaha aad qabatid maalintii inta aad haysatid qalabka. Marka aad buuxineysid qoraalka, isticmaal saacadda ka muuqata dhanka hore qalabka "monitorka".
- Waxaa lagu fari doonaa in aadan qoynin qalabka "monitorka". Lama ogolaan doono qabeyska saxanka, qabeyska tubada ama dabaal inta aad haysatid qalabka "monitorka."
- Waxaad awood u heli doontaa in aad ka saartid qalabka "monitorka" muddada 24-48 saac baarista kaddib haddii aad raali ka tahay in sidaas la sameeyo. Haddii kale, waxaad ku soo celin kartaa waaxda Daweynta Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha si looga saaro.
- Haddii aad qabtid su'aalo inta aad haysatid qalabka "monitor", fadlan wac Shabaarka Shiddada Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha (Cardiovascular Stress Lab), telefoonka 507-389-8618.

### Baarista Kaddib:

- Waxaad qalabka Holter Monitor ku soo celisaa waaxda Cardiovascular Medicine.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeyso waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbaday baarista muddo shan maalin oo la shaqeeyo gudaheeda.
- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

**Haddii aan aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natiijada.**

**Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8519.**

**Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Sawirka Baarista.**

**MC1758SO (rev 11.13)**